

# 3SquaresVT

## Mas'uuliyadaha Ka Warbixinta

### Ka Warbixinta Isbedelada Inta Aad Ku Jirto Shahaadadaada

Ma dhaqaaqday? Miyuu isbeddelay dakhligaaga ama kharashka gurigaaga Ma jiraa qof gurigaaga ka mid noqday ama ka baxay? Nuqul ka mid ah foomka “Heshiiska ka warbixinta Isbeddellada” ayaa sheegaya waxaad u baahan tahay inaad sameyso haddii aad hesho dheefaha 3SquaresVT.

### Maxaa Ka Warbixinaya

- Haddii dakhliga guud ee qoyskaaga uu **ka hooseeyay** 130% heerka saboolnimada federaalka markii aad codsanaysay, ka dibna uu gaaro 130% ama ka badan bil gudaheed (ka eeg shaxda hoose), waa inaad ku soo wargalisaa isbeddelkan tobanka maalmood ee ugu horreeya ee xiga bil.
- Marka qof weyn oo awood leh oo aan ku tiirsaneyn qoyskaaga uu waayo shaqo, wuxuu yareeyaa saacadaha shaqada ama wax isbeddel ah ayaa ku yimaada xaaladdiisa.
- Sidoo kale, haddii dakhligaagu hoos u dhaco ama kharashyadaadu ay kordhaan, ka warbixi isbeddeladan. **Waxaa laga yaabaa inaad heli karto waxtarro dheeri ah.**
- Reeraha macaashka ka hela Reach Up, Medicaid, Dr. Dynasaur, VPharm, ama Qofka Muhiimka ah waa inay ku soo sheegaan **isbeddelada** 10 maalmood gudahood.

Tirada Reerka	1	2	3	4	5	6	7	8	Xubin Kasta oo dheeri ah
130% Heerka Dakhliga (bishii)	\$1,396	\$1,888	\$2,379	\$2,871	\$3,363	\$3,885	\$4,374	\$4,839	add \$492


### Sida Ioo Warbixiyo

U dir foom iyo nuqulo kasta oo dukumiinti ah:

**DCF/Economic Services Division, Application & Document Processing Center**  
**280 State Drive, Waterbury, VT 05671-1020**

Ka dib markay Adeegyada Dhaqaalaha ka baaraandegaan isbeddeladaada la soo sheegay, waxay kuu soo diri doonaan warqad ay ku sharxayaan wixii isbeddel ah ee ku yimaada qaddarka dheefahaaga.

Oct 2021



# 3SquaresVT

## Mas'uuliyadaha Ka Warbixinta

### Warbixinta Ku Meel Gaarka ah

- Dhammaan qoysaska 3SquaresVT waxay u baahan doonaan inay dhammaystiraan warbixin ku-meel-gaadh ah badhtamaha muddada shahaadadooda.
- Qoysaska shahaadada haysta ee 12 bilood waxay helayaan warbixintan 6 bilood kadib markay helaan dheefaha.
- Qoysaska shahaadadooda la siiyay 24 bilood waxay heli doonaan warbixintan 12 bilood kadib markay helaan dheefaha.
- Foomkan gaaban waa in la buuxiyaa, la saxexaa, laguna soo celiyaa Adeegyada Dhaqaalaha waqtigiisa, xitaa haddii aysan jirin wax isbeddel ah, ama dheefaha ay jogsan doonaan. **Ma jiro wareysi xilligan.**

### Xaqiijinta

- Qoysaska badankood waxay u baahan yihiin dib-u-qiimeyn 12-kii biloodba mar si ay u sii wataan dheefaha 3SquaresVT. Dadka 60 jirka ah iyo wixii ka weyn, iyo dadka naafada ah ee dakhliga go'an go'an waxaa laga yaabaa inay helaan macaash ilaa 24 bilood ka hor inta aan dib-u-xaqiijinta loo baahnayn.
- Adeegyada Dhaqaalaha ayaa boostada kugu soo ogeysiin doona markaad u baahan tahay inaad dib u xaqiijiso.
- Waxaad u baahan doontaa inaad soo dirto dukumiinti xoogaa ah, laakiin maahan dhammaan dukumintiyada loo baahnaa markii ugu horreysay ee arjiga. Si taxaddar leh u akhri qoraaladaada dib-u-xaqiijinta si aad u ogaato nuqulada la dirayo.
- Buuxi dhammaan foomamka lagama maarmaanka ah oo dib ugu dir boostada Xarunta Codsiga & Dukumintiga. **Waa inaad keentaa dukumiintiyada lagaa codsaday oo aad leedahay wareysi taleefan dib-u-xaqiijin ah.**
- **Fadlan ogow: Haddii aadan soo celin foomamkaaga dib-u-xaqiijinta illaa 15-ka bisha ugu dambeysa muddada shahaadadaada, dheefahaaga waa la joojin karaa.**

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan ka warbixinta isbeddellada, si aad ugu soo warbixiso isbeddelada taleefanka, ama aad u hesho foom, wac Adeegyada Dhaqaalaha **1-800-479-6151** (turjubaanka luqadda lagu hadlo, wac **1-855-247-3092**)

Wixii caawimaad ah ee ku saabsan waraaqahaaga, garaac 2-1-1 si aad ugu xirto kaalmada deegaanka. Haddii aad ka weyn tahay 60, ka wac khadka caawimaadda **1-800-642-5119**.

Oct 2021